



Golaha Guddida Waxbarashadu Waxay Ansixiyeen Maalinta Isniinta Janaayo 31keedu In Loo Asteeyo Maalinta Horumarinta Xirfadaha iyo Maalinta Qorsheynta Macallimiinta- Ardaydu Waa Fasax

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Maalinta Isniinta ee Janaayo 31keeda, macallimiinta iyo shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay noqon doontaa maalin ay iska kaashadaan qorsheynta bilowga simistarka labaad, maalintaasi fasaladii waxbarashada ee ay ardaydu qaadan jireen ma jiri doonaan. Arrintani waxay timid ka dib markii Golaha Guddida Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland, ay maalintii Talladadii ku kulmeen [kulan aan caadi ahayn](#), iyada oo si wada jir ah loogu codeeyey in laga dhigo Janaayo 31keeda maalinta wada shaqeynta shaqaalaha iyo qorsheynta shaqaalaha ku sugan dugsiyada, iyada oo abuuraysa fursad ay shaqaalaha dugsiyada ay ka wada shaqeeyaan qorshayaasha dhismaha dugsiyada sidii uu u noqon lahaa jawi ay degan oo ardaydu wax ku baran karaan iyo sidii loo taageeri lahaa baahiyaha kala duwanaansha ardaydeena dhinaca waxbarashada.

Maalinta Jimcaha, Janaayo 28keeda waxaa hore loogu sii diiwaangaliyey inay noqoto dhammaadka simistarka labaad la isku dubarido dhibcaha ay ardaydu imtixaanada ka keenaan iyo maalinta qorsheynta macallimiinta, maalintaasi ma jirto fasaladii waxbarashada ee ardaydu dugsiyada ku qaadan jireen. **Ardaydu waxay dugsiyada ku soo noqon doonaan qof ahaan inay waxbarashadoodu ku qaataan maalinta Tallaadada, Febraayo 1deeda.** Si aad u aragto wixii warar ah ee cusub jadwalka taariikhda sanad-dugsiyeedka 2021-2022, fadlan waxaad [gujisaa halkan](#).

Waxaan aqoonsanahay in isbedel kasta oo lagu sameeyo jadwalka taariikhda dugsiyadeena uu saameyn ku yeelanayo qoys kasta oo ka mid ah qoysaskeen siyaabo kala duwan. Waxaan sii wadi doonaa mahada weyn ee aan idiin hayno iyo anaka oo idinka mahadnaqeyna dulqaadkiina iyo dabacsanaantiina inta aan ku gudo jirno sii aan uga bixi lahayn sanad-dugsiyeedkani- oo ah mid aan hore inoo soo marin. Waxaan sameyneynaa qorshayaal



anaka oo kaashaneyna bulshadeena leh dhaqanada kala duwan sidii aan u siin lahayn fursado lagu kobcinayo qeybo fara badan oo ka mid ah dugsiyadeena magaalada Janaayo 31keeda. Waxaan idinla wadaagi doonaan todobaadka soo socda macluumaad dheeraad ah.

Ugu dambeyn, waxaan rabaa inaan fursadani uga faa'iideysto sidii aan ugu mahadcelin lahaa shaqaalaha ka shaqeeya dugsiyada iyo macallimiinta fasalada waxbarashada. Waxaan aqoonsanahay in sanadkani gaar ahaan, shaqaale ahaan midba midka kale is taageerteen, sidii aad addeeg u siin lahaydeen ardaydeena. Sanad-dugsiyeedkani shakhsi ahaan iyo xirfad ahaanba wuxuu ahaa mid caqabadihiisa leh, markaa waxaan rajeneynaa iskaashi dheeraad ah iyo qorsheynta waqtiga inuu xoojin doono dadaalada wada jirka ah ee aan wax ku barayno ardaydeena.

Dr. Cheryl Proctor

Ku-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada ee Bulshooyinka Dugsiga iyo Waxbarashada